Iskuulada Dad-weynaha Aurora
Su'aalaha Badanaaba La Isweydiiyo ee Soonka Xiriirka [ACTION Zone]
21 bisha Agoosto, 2015

Waa maxay ACTION Zone?
Iyadoo ay barbarsocoto qorshaha tabaha APS, APS 2020: Qaabaynta Mustaqbalka, iyo Qorshe Udejinta ACTION Zone, APS waxay soo jeedinnaysaa in sannadkan ay soo saarto hal ACTION Zone, iyo sannadaha soo socdana ay soo saarto ilaa iyo seddex ACTION Zones. ACTION Zone kastana wuxuu yeelan doonaa xiriir iskuulaadka udhaxeeya ee isku xira, oo dhammaan Iskuulaadka oo isla soonaha ku wada yaala ay wadaagi doonaan sifooyin qaar oo muhiim ah. Iskuul kasta ee soonaha ku yaala waxay yeelan doonaan fursad ay kula yimaadaan qorshe iskuulkooda u gaar ah. Qorshahan waxay qayb ka noqon doonaan Codsi loogu talagalay Aqoonsiyada Horrumarinta Iskuulaadka Colorado [Colorado Innovation School Status]. Codsiga iyo qaabaynta iskuul kasta oo cusub wuxuu u baahnaan doonaan inuu si cad oo dhammaystiran usoo bandhiggo sida iskuulka uu isticmaali doono in iskuulka iskii is-maamulo ee dhanka shaqaalaha, waqtiga, lacagta, iyo barnaamijyada la yimaada aqoonsiga horrumarinta si guusha ardayga ay noqoto mid lagu macaasho.

Maxay loola jeeda magac la soo gaabiyay ee ACTION ee Soonka ACTION Zones?
ACTION wuxuu u taagan yahay oo ACTION Zones udhigmaa **J**aaliyad **A**urora ka dhisan oo horseeda **I**sbedel, **H**alabuur iyo **S**habakad **F**ursad ah [Aurora Community-based Transformation, Innovation and Opportunity Network (ACTION) Zones],

Ma dowladda Gobolka ayaa amar ku bixisay in la abuuro ACTION Zone?
Qorshaha ACTION Zone dowladdu Gobolka **ma** amrin oo qasab kama dhigin. Degmo dugsiyeed badan oo wadanka oo dhan ku baahsan ayaa waxay hirgeliyeen qaabab tan la mid ah oo qaab loogu danleeyahay in Iskuulaadka laga dhigo kuwa horrumarin iyo dib-u-habayn iyadoo la kaashanayo jaaliyadda; si meesha looga saaro caqabaddaha la iska rumaysto; iyo in si xaraarad leh oo dhaqso ah loo horrumariyo oona loo wanaajiyo fursaddaha waxbarasho iyo guusha ardayga.

Maxay tahay sababtu ay iskuulka u raadinayaan aqoonsiga Horrumarinta oo ay qayb ka tahay ACTION Zone?
Iskuulaadka iyo degmo dugsiyeedka waxay wajaheen loolan ah in la dedejiyo guusha ardayga. Aqoonsiga horrumarinta waxay iskuulaadka ku jira ACTION Zone u awood usiinaysaa in qaabkii hore si ka duwan ay u fekiraan oo ay nidaam dib-u-habayn ah iskuulkoodu ku sameeyaan si kor loogu qaado guusha dhammaan ardayda oo dhan, si markaa ardaydeenu ay awood ugu yeeshaan in ay gaaraan mustaqbal guud leh.

Maxay ka dhigan tahay in la helo Aqoonsiga Horrumarinta?
Aqoonsiga horrumarinta oo Gobolka aqoonsado ayaa iskuulka wuxuu u ogolaanayaa inuu iskuulka qayb uu ka sii ahaado degmo dugsiyeedka iyagoo isla markaasna la siinayo in jaaliyadda ay ka gaystaan nidaam dib-u-habayn iyaga ah. Aqoonsiga horrumarin ah waxay iskuulka ay u ogolaanaysaa inay soo saarto qorsh ay igu qaabaystaan oo gaar ah ee qaabab, barnaamijyo iyo nidaam awood oo ardayda iskuulka dhigata dan u ah. Waxay shuruud ay uga dhigaysaa in jaaliyadda iskuulka oo dhan ay siwadajir ah ay u wadashaqeeyaan si ay u hirgeliyaan qaabab horrumar leh oo ardayda u horseeda in ay gaaraan guul saamayn ku

yeelan kara dadka, waqtiga, barnaamijyada iyo lacagta. Waxaa usoo noqonaya, in iskuulka ay dhici karto in ay ka bar noqdaan sharciyadii iyo qaanuunkii gobolka iyo degmo dugsiyeed ahaan oo ah hirgelinta qorshaha horrumarinta. Iskuulaadka horrumarinta ee Gobolka uu ansaxiyo waxaa suurtogeliyay Xeerkii Horrumarinta Iskuulaadka ee 2008.

Sidee ayuu ACTION Zones uga duwan yahay barnaa mijyada kale ee horrumarinta iskuulaadka ee APS ka jira sida Tijaabada Iskuulaadka [Pilot Schools], Iskuulaadka Barashada Dhaqsiga iyo Iskuulaadka Gaarka ah?
Qorshaha ACTION Zones waxaa aassaas looga dhigayaa aassaaska iminka jira ee soo saarista iskuulaad gaar ah, tijaabo ah iyo iskuulaad degmo waynta ay horrumariso. Nidaamka ACTION Zone wuxuu isku keenaa baahida, hadafka iyo mudnaanta jaaliyadda ee iskuulaadka soonka ku dhexyaala hadafyadooda iyo waxa u muhiimsan ee qorshaha tabaha degmadaka, APS 2020: Qaabaynta Mutaqbalka. Qorshaha ACTION Zone waxaa loo habaynayaa inuu jawaab-celin u noqdo baahida gaarka ah ee jaaliyadda iyadoo la isticmaalayo yoolka horrumarinta iyo ilaha la tiigsanayo. Waxa ay iskuulaadka soonkaas ku dhexyaala ay siinaysaa fursaddo iyo in ay qaabaystaan assaaska iskuulka iyo in ay in wax laga qabto baahida gaarka ah iyo marxaladda ay ardaydu ku sugan yihiin.

Sidee ayay iskuulaadka ay uga qaybqaadan karaan ACTION Zone ka?

- Soonka koowaad ee Iskuullada Dad-weynaha Aurora ee ACTION Zone waxaa ka mid noqon doona iskuulaadka soo buuxiya laba shuruud:
    - Iskuulaadka waa inuu ku yaala Bartamaha Dugsiga Sare ee [Aurora Central High School] oo uu ahaadaa kuwa ardayda usoo gudbiya.
    - Iskuulku waa inuu u dhigmaa kuwa ACTION Zone.

- Ilaa laga doorto Guddi la Talin ee Soonka, dhammaan iskuulaadka ku yaala Bartamaha Dugsiga Sare ee Aurora oo ah kuwa ardayda usoo gudbiya waxay heli doonaan macluumaad ku saabsan fursad ay uga qaybqaataan soonka ACTION Zone.

Waa kuma kuwa ugu firfircoon oo kaalinta ku leh nidaam geedi-socodkan?

- Aragtida Waxbarashada ee [Mass Insight Education]
- Guddiga la Talinta ee Soonka [Zone Advisory Committee]
- Kooxda Habaynta Soonka [Zone Design Team]
- Kooxda Habaynta Iskuulka [School Design Team]

Waa kuma Mass Insight Education?
Mass Insight Education waa urur aan macaash raadis ahayn oo dib-u-habeeya waxbarashada u ololeeya kaasoo la shaqeeya iskuulaad qaar, degmo dugsiyeedyo iyo gobollo qaar waxay dib-u-habayn ku sameeyaan iskuulaadka waxqabadkoodu ugu hooseeyo oo degmo dugsiyeedka waxay ka caawiyaan in ay ka soo baxaan baahida ardayda.

Ururkan Mass Insight miyuu ka howlgalayaa iskuuladeena?
Mass Insight ma ahan urur gaar ah oo iskuulaadkana si madax-banaani ugalama shaqeeyo. Mass Insight waxay aaminsan yihiin in degmo dugsiyeedka ay kaalin xoogan in ay ku leedahay degmo dugsiyeed in ay ka ciyaarto oo ay ku dadaasho si degmo dugsiyeedka ay uga caawin la'hayd sida iskuulka uu u taageeri la'haa ardayda iyo qoysaska.

Waa maxay Guddiga la Talinta ee Soonka?

- Guddiga la Talinta ee Soonka [Zone Advisory Committee (ZAC)], waa guddi uu magacaabo Muraaqibka APS, waa koox dhowr ah, hogaamiyayaal maxalli ah oo xiriiro ad-adag la leh [Original Aurora] oo aqoonna u leh dhaqaalaha iyo fursaddaha ay heli karaan ardayda ka qallan-jebisa dugsiyadda APS. Mas'uuliyadda koowaad ee ZAC saaran ayaa waxay tahay in ay qiimeeyaan oo ay doortaan nooca ACTION Zone.

- Mar haddii nooca la doorto, Guddiga la Talinta ee Soonka waxay qaban doonaan laba door:
    - In ay Muraaqibka ay kala taliyaan haddii codsiga soonka ee la soo gudbiyay uu soo buuxiyay shuruudii u taalay iyo haddii kale ka hor inta arjiga aan horey aysan ugu bixin gacanta kooxda habaynta iskuulka loo sii socodsiin Guddiga Waxbarashada ee APS
    - Waxay Muraaqibka ay ka caawiyaan inuu codsiyada horrumarinta uu usoo bandhiggo Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Colorado [Colorado State Board].

Kuma ku jira Guddiga la Talinta ee Soonka? Xubnaha Guddiga la Talinta ee Soonka waxaa ku jira oo ka mid ah Norm Brownstien, Jim Kelley, Mariana Ledezma-Amorosi, Mary Lewis, Ruben Medina, George "Skip" Noe, Dr. Betsy Oudenhoven, Maisha Pollard, Karen Porter iyo Aaron Thompson**.**

- Arag taariikhda shaqsiyaadka xubinta ka ah Guddiga la Talinta ee Soonka .

Waa maxay Kooxda Habaynta Soonka?

- Kooxda Habaynta Soonka, kaasoo ah kuwa kuu magacaawo Muraaqibka iyo hogaamiyeyaasha iskuulka, oo wuxuu ka kooban yahay dad iskuulka qayb ka ah oo seddex qaybood:
    - Shaqaalaha dugsiga
    - Shaqaalaha degmo dugsiyeedka
    - Wadaageyaasha muhiim ah
- Kooxda Habaynta Soonka Waxay:
    - Soo saari doonaan nidaam geedi-socodka horrumarinta arjiyada iyo howsha habaynta iskuulka
    - Iskuulaadka ay siin doonaan taago inta howsha geedi-socodka ay sii socoto
    - Hubin doonaan in iskuulka habayn iyo horrumarinta codsiga ay tahay mid tayo ahaan ku filan oo uu noqdo arji ay soo ansaxin doonaan Guddiga Waxbarashada ee APS iyo Guddiga Waxbarashada Gobolka Coloraado

Waa maxay Kooxda Habaynta Iskuulka?

- Kooxda Habaynta Iskuulka waxay qoban doonaan shir dhici doona saacaddaha iskuulka ka dib inuu soo bandhigaan xiiso ah in soonka lagu soo biiro iyo in qiimanta diyaarinta iskuulka la dhammaystiro, kaasoo dib y u eegi doonaan shaqaalaha iyo ardayda nidaamka iskuulka ku jirta iyo tayada waxbarasho.

- Kooxda Habaynta Iskuulka gebi ahaan waxay matali doonaan jaaliyadda iskuulka, oo waxaa ka mid noqon doona:
    - Shaqaalaha dugsiga
    - Waalidiinta
    - Ardayda (halka ay ku haboonyihiin)
    - Wadaageyaasha muhiim ah

- Kooxda Habaynta Iskuulka waxay:
    - Falanqayn doonaan Qiimanta Diyaarinta Iskuulka La Dhammaystiro iyo dukumentiyo kale oo quseeya
    - Go'aamin doonaan dalabyada haynta iskuulaadka ee ka soo baxa shuruuda Action Zone
    - Qori doonaan arjiga gobolka looga codsanayo aqoonsiga horrumarinta
    - Dhammaystiri doonaan habaynta iskuulka oo waxay usoo bandhigi doonaan Kooxda Habaynta Soonka

Waa maxay Qiimanta Diyaarinta Iskuulka?

Qiimanta diyaarinta iskuulka, oo ay qabannayaan Mass Insight, waa dib u baarida kartida iskuulka oo shaqaalaha iyo ardayda looga caawinnayo oona maarayn iyo hoggaan isbeddel loogu jihaynayo. Qiimaynta diyaargaraynta ayaa waxaa isticmaali doona maamulayaasha iyo agaasimayaasha P-20 si iskuulaadka ay uga caawiyaan in ay abaabul ama habeeyaan kooxahooda habaynta.

Waa maxay jadwalka dib-u-habaynta iskuulka?

Qiimanta diyaarinta iskuulka waxay dhici doontaa dhammaadka bisha Agoosto iyo horraadka bisha Seteember. Jaaliyaddaha iskuulka ee jecel inay wax badan ka ogaadaan suurtogalka horrumarintan waxay dib-u-habaynta ay bilaabmi doontaa dhammaadka bisha Seteember oo waxayna sii socon doontaa xilliga dayrta. Hadafka ayaa wuxuu yahay in la qoro arjiyada horrumarinta iyo dib-u-habayn iskuulka la qoro oona jaaliyaddaha iskuulka ay taageerto inta lagu jiro bisha Janaayo ee 2016. Waxaa ka sii fiican, in Guddiga Waxbarashada ee Iskuulaadka Dad-weynaha Aurora waxay heli doontaa fursad ay dib ugu eegayso habaynta cusub iyo arjiga inta lagu jiro xilliga jiilaalka ee 2016, oo waxay soo bandhigi doonaan qoraallada ku socota Guddiga Waxbarashada Gobolka Colorado markaa ka dib.

Isbeddellada ma markiiba ayay ka dhici doonaan nidaamka iskuulkeena?
Sannad kasta, iskuulaadka wanaajinna ku sameyn ayay sameeyaan waa qaab ay ku taageerayaan ardaydooda iyo qoysaskooda. Si kastaba ha noqotee, dib-u-habaynta dhici karta ee arjiga lagu soo qoro oo ka oo jeediyo aysan isla markiiba la arki doonin, oo hadafka ayaa wuxuu yahay inuu bilaabmo sanad dugsiyeedka 2016-17 oo ku bilaabmo nidaamyada iskuulka cusub.

Yaa gaari doona go'aanka kama dambeyska ah ee aqoonsiga horrumarinta ee Gobolka?
Aqoonsigaas horrumarinta waa in ay soo ansaxiyaan Guddiga Waxbarashada ee APS iyo Guddiga Waxbarashada Gobolka.

Sidee bay waalidiintu uga qaybqaadan karaan?
Degmo dugsiyeedka APS aad ayay uqiimaysaa talada waalidiinta oo waxay taageertaa ubad kasta waxbarashadooda. Waalidiinta qayb muhiim ah ayay ka ciyaarayaan dib-u-habaynta iskuulka oo sida APS ay ACTION Zone u taageertaa guud ahaan. Wakiilka waalidka waxay qayb ka ahaan doonaan Guddiga la Talinta ee Soonka, oo sidoo kale waalidiinta waxay ka mid noqon doonaan Kooxda Habaynta Iskuulka. Jawaabcelinta waalidiintana markastaaba waa la soo dhoweeyaa oo muhiim ayay noo tahay maadaama iskuulaadka ay dib uga fekirayaan qaabka ay ardaydu ugu adeegi la'haayeen. Shaqaalaha degmo dugsiyeedka iyo iskuulaadka APS inta howshan ay socoto waalidiinta ayay talo ka raadsan doonaan. Kulamo ayaa jaaliyadda loo qaban doonaa si waalidiinta si joogto ah loo siiyo wixii ka soo cusboonaaday oona jaaliyadda loo siiyo fursad ay uga faaloon karaan oo ay su'aalo ka waydiin karaa hogaamiyeyaasha iskuulka iyo degmo dugsiyeedka.

Maxay tahay doorka ay macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulka ay ka ciyaari karaan qorshahan la soo jeediyay ee ACTION Zone oo ah mid lagu wanaajinayo dib-u-habaynta iskuulka?
Sida hoos timaada sharciga Colorado, macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulka waa in ay ansaxiyaan arjiga horrumarinta. Haddii arjiga horrumarinta uu ku talinayo in beddelaad lagu sameeyo shaqooyinkooda, qodobadan arjiga ku qoran waa in cod laga bixiyaa.

Waa maxay mudada ay qaadan doonto in arjiga lagu soo ansaxiyo?
Waxay u badan tahay in arjiyada horrumarinta loo gudbiyo APS iyo guddiga waxbarashada ee Gobolka inta lagu jiro xilliga jiilaalka ama go' ee 2016. Markaas wixii ka dambeeya guddiyada waxay dib u eegi doonaan arjiyada oo aqoonsiga ACTION Zone way ansaxin karaan ama way diidayaan.